

Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Maarso 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Maarso 2021 ayaa ahaa 122.47, marka la barbardhigo 119.88 bishii Febraayo 2021.

Isbedel bileedka, Maarso 2021, marka la barbar dhigo Febraayo 2021, ayaa sare u kacay 2.17 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya 0.91 boqolkiiba bishii Febraayo 2021.

Sare u kac bileedka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Cuntada & Cabitaanda** (3.30 boqolkiiba) **Caafimadka** (+4.13 boqolkiiba). Qiima kororka Cuntada & Cabitaanda ugu badan ayaa ka dhashay sare u kac ku yimid qiimaha cuntada (+3.39 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Miraha (+6.72 boqolkiiba) iyo qudaarta (+4.49 boqolkiiba) (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Maarso 2020 iyo Maarso 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu sare u kacay 5.08 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 5.03 boqolkiiba ee 12kii bilood (Febraayo 2020 iyo Febraayo 2021).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maarso 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Maarso 2021	
Tusaha bishan (Maarso 2021)	122.47
Tusaha bishii hore (Febraayo 2021)	119.88
Tusaha sanadkii hore (Maarso 2020)	116.55
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	2.17%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.08%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka Boqoleyda ee 12ka bilood

Tixraaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maarso 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maarso 2021

Heerka sicir-bararka bisha Maarso 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2020 iyo Maarso 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.08 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maarso 2021 iyo Maarso 2020, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Febraayo 2020 iyo Febraayo 2021 oo ahaa 5.03 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa sare u kacay 2.17 boqolkiiba bisha Maarso 2021, marka labarbardhigo hoos u dhac dhan 0.91 boqolkiiba bishii Febraayo 2021.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maarso 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 3.30 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Maarso 2021 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 0.33 boqolkiiba bishii Febraayo 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa gaaray -0.30 boqolkiiba Maarso 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 0.01 boqolkiiba Febraayo 2021.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemay sare bille ah oo dhan 1.40 boqolkiiba intii lagu guda jiray Maarso 2021, marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 1.08 boqolkiiba bishii Febraayo 2021. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Maarso 2021 ayaa gaaray 11.36 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Febraayo 2021 oo ahaa 9.82 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB-da & Qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maarso 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maarso 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 22.91 boqolkiiba bishii Maarso 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitalada oo gaaray (+49.96 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday(+150.00 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 11.36 boqolkiiba bisha Maarso 2021, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha kirada guryaha (19.67 boqolkiiba). qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha ay bixiyaan kireystayaasha sida, Apartment-ga (+30.23 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 19.22 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+19.25 boqolkiiba) iyo kabaha (19.09 boqolkiiba) taasoo ka dhalatay sare u kac ku yimid dharka dumarka oo gaaray (+25.15 boqolkiiba), caruurta (23.15 boqolkiiba) iyo kabaha oo ahaa (+19.09).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 14.75 boqolkiiba Maarso 2021. Sare u kaca waxaa sababay saameynta shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+14.95 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dahabka iyo Saacadaha (+17.13 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 8.59 boqolkiiba ee Maarso 2021, marka la barbardhigo 9.38 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Febraayo 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid agabka Qoyska (+14.34 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta** ayaa laga dareemay sare u kac gaaraya 3.23 boqolkiiba Maarso 2021. Qiima koror ka ugu badan ayaa ka yimid adeega telefoonada oo gaaray (+9.99%).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maarso 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sameysay hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -6.30 boqolkiiba bishii Maarso 2021. Sida la wariyey hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa in qiimaha Qaadka uu ahaa mid aan fadhin bishii Maarso 2021, dhaqdhaqaaqa qiimaha tubaakada ayaa ah mid sabaynaya .

War bixin bileedka bisha **Maarso 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

B. ybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maarso 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Maarso 2021 (+)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 3.30 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Maarso 2021 marka la barbardhigo 0.33 boqolkiiba bishii Febraayo 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Qudaarta +4.49 boqolkiiba iyo Miraha Furuutiska ah +6.72boqolkiiba
- **Caafimaadka** ayaa sare u kacay 4.13 boqolkiiba intii lagu guda jiray bishii Maarso 2021 halka 3.86 ladiwaan galiyey bishii Febraayo 2021 . Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabada caafimaadka oo gaaray (+14.21 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maarso 2021 (-)

Guud ahaan, majirin qeybaha TSB sare u kac la taaban karo oo bille ah Maarso 2021.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Maarso 2021 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maarso 2020 TSB	Febraayo 2021 TSB	Maarso 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	116.55	119.88	122.47	2.17	5.08
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	124.19	119.85	123.81	3.30	-0.30
Tubaakadda	1.25	137.08	128.44	128.44	0.00	-6.30
Dharka & Kabaha	5.03	121.89	145.31	145.31	0.00	19.22
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	103.88	114.08	115.68	1.40	11.36
Agabka Guryaha	2.93	103.70	112.61	112.61	0.00	8.59
Caafimaadka	5.00	124.99	147.54	153.63	4.13	22.91
Gaadiidka	3.77	110.57	107.17	107.73	0.52	-2.57
Isgaarsiinta	2.80	99.57	102.78	102.78	0.00	3.23
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.54	100.04	101.90	1.86	3.41
Tacliinta	4.00	107.75	109.80	109.80	0.00	1.91
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.61	138.44	138.44	0.00	1.35
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	106.20	119.86	121.87	1.67	14.75

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soo saarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Abriil 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Maajo 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>


War bixin bileedka bisha **Maarso 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistiskada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maarso 2021 marka loo eego COICOPka

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn ku saabsan heerka sicir bararka ee bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kala saameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

Dhammaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) Heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maarso** 2021 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia